

UJEEDO: WAKAALAD GAAR AH "PROCURO DE SPECIALE"

Maanta oo ay taariikhdu tahay **03/05/2025**, Anigoo ah **Dr. Maxamed C/Ilaahi Maxamed "Max'ed Nootayo"**, Lehna Nootaayaha Tayo, Xafiisna ku leh Wadada Koowaad ee Suuqa Bakaaraha Dhinaca Galbeed ee Daarta Maalin Taajir ee Magaalada Muqdisho, Waxaa iyyimid ayagoo heshiis ah, Mudanayaasha hoos ku Xusan:-

WAKAALAD BIXIYE:- NUR HASHI DIRSHE, Ina Abshiro Maxamed Guure, Somali ah, Ku Dhashay: Moyale, Sanadkii: 01-01-1985, Sita Kenyan passport, Lr. CK167283	LA WAKIISHE:- MUHUDIN MOHAMED MOHAMUD, Ina Qaali Xaashi Dirshe, Somali ah, Ku Dhashay Hobyo, Sanadkii: 01-01-1991, Degan Dayniile, Sita Somali Passport, Lr. P01269332
TILMAAMAHA GURIGA Guri Dhisn oo Ku yaal: Muqdisho , Degmada: (Hodan) , Cabirka: (20X15-Mt)-M , Looto No: 2580-F , W.M.L: (Rep.89799/MPN/2025) , Tr. 23/04/2025 , Kana Soo Baxay Nootaayo Muqdisho, Una Saxiixay Dr. Saciid Cali Cosoble	SOOHDINTA GURIGA Bari: dhul dad, Koonfur: dhul dad, Galbeed: dhul dad, Waqooyi: Jid

B- Aniga oo ah **NUR HASHI DIRSHE**, Waxaan qoraalkaan ku Cadaynayaa Aniga oo Maskaxda iyo Caqligaba ka fiyow Cid I qasabtayna aysan Jirin in aan Wakiishay **MUHUDIN MOHAMED MOHAMUD** Una Wakiishay Wakaalad Gaar ah, oo Ku Saabsan Guriga Tilmaamihisu Sare Ku Xusan yahay, hadaba waxaan si buuxda ugu wakiishay in uu ii Gadi karo, wareejin karo, hibeyn karo, Xafidi karo, dhisi karo, Dayactiri karo, kireeyn karo, Xanaaneyn karo, u Doodi karo, Qareen iigu qaban karo haddii loo baahdo, igu Matali karo dhan kasta la iiga baahdo, uuna Maxkamaddaha Hortooda iiga doodi karo, una idman yahay in uu si buuxda u Maamulo Gurigaas leh tilmaamaha kor kusoo sheegay, Waxaan mar kale sii caddeynayaa in **MUHUDIN MOHAMED MOHAMUD** awoodaas aan siiyay uu u madax banaan yahay oo aniga Gurigaas aan soo sheegay ka macaamilidiisa wax la iiga baahan karo aysan jiri doonin.

T- Aniga oo ah **MUHUDIN MOHAMED MOHAMUD**, Waxaan Nootaayada Horteeda Ka Caddaynayaa in aan aqbalay Wakaalada uu isiiyey **NUR HASHI DIRSHE**, islamarkaana aan Xilkaas aan ugu Soo Bixi doono Si Hufan oo Shareecada Islaamka Waafaqsan Insha Allah.

SAXIIXA WAKAALAD BIXIYAHA

NUR HASHI DIRSHE

Nur Hashi Dirshe

SAXIIXA LA WAKIISHAHA

MUHUDIN MOHAMED MOHAMUD

Muhammad Mohamud

SAXIIXA MARKHAATIYAASHA

1- ABDIKADIR ALI MOHAMED

Abdikadir Ali Mohamed

2- ABDIRISAK IRSHE HUSSEIN

Abdirisak Irshah Hussein

(XAFIISKA NOOTAAYAHA)

REP. 1552/T.P.N/25, Tr. 03/05/2025, Muqdisho, Anigoo ah Nootaayaha Tayo:- **Dr. Maxamed C/Ilaahi Maxamed "Max'ed Nootayo"**, Waxaan Sugayaa in Saxiixyada Kor Ku Xusan ay yihiin Saxiixyadii Runta ahaa ee 1- **NUR HASHI DIRSHE** Ahna (Wakaalad Bixiye), 2- **MUHUDIN MOHAMED MOHAMUD** Ahna (La Wakiishe) iyo Markhaatiyaasha, Waxaana Laga Wada Saxiixay ayagoo Raali ah, Caafimaad Qaba, Maskaxdoodu Taam tahay, Cid Khasabtayna aysan jirin Ka dib Markii Loo Aqriyey Wakaaladaan, Waxaa Lagu Qoray Diiwaanka Guud ee Nootaayada Waxaana Loo Keydiyey Nuqul.



NOOTAAYAHA

Dr. Maxamed C/Ilaahi Maxamed "Max'ed Nootayo"





MUQDISHO PUBLIC NOTICE
POSTO NO: 212163

XAFIISKA NOOTAAYAHA MUQDISHO

UJEEDO: HESHIIS KU SAABSAN KALA GADASHO GURI VILLO AH LEHNA SHARCI MUNCIPALE AH.

Muqdisho: Maanta oo ay taariikhdu tahay 23/04/2025, anigoo ah Dr. Saciid Cali Cosoble, ahna Nootaayaha Muqdisho, xafiiska ku leh Suuqa Bakaaraha, Daarta Osoble Apartments 1, agagaarka Masjidka Abuhurayra ee Magaalada Muqdisho, waxaa xafiiska iigu yimid ayagoo heshiis ah dadka hoos ku xusan:

ISKA IIBIYE: C/qaadir Maxamed Yuusuf, Hooyo: Caasho Cali Jimcaale, Somali ah, Ku Dhashay: Garissa, Ken, Sanadkil: 1978, Degan Muqdisho, Leh: Kenyan Passport No. BK130674.	IIBSADE: Nur Hashi Dirshe, Hooyo: Abshiro Maxamed Guurre, Somali ah, Ku Dhashay: Moyale, Sanadkil: 1985, Degan Nairobi, Leh: Kenyan ID No. 25303037. WAKIILKA IIBSADAHA: Salaad Xaashi Diirshe.
WARBIXINTA GURIGA LA KALA IIBSANAAYO Gurigaan oo ku yaal: Muqdisho, Degmada: Hodan, Cabirka: (20X15)-M, Looto No: 2580-F, W.M.L: 58350/2015, Tr. 20/08/2015, Kana Soo Baxay Nootaayo Muqdisho, Dr. Saciid Cali Cosoble.	SOOHDINTA GURIGA Bari: Dhul dad, Koonfur: Dhul dad, Galbeed: Dhul dad, Waqooyi: Jid. QIIMAHA GURIGA: USD \$65,000 (Lixdan Iyo Shan Kun Oo Doolarka Mareykanka Ah).
ASALKII HORE EE DHULKA: Magaca: Sh. Cismaan Sh. Yuusuf, Cabirka: (40X30)-M Looto No: 2579 ilaa 2582-F, Rasiid No. 85510, Tr. 09/05/1988, Kana Soo Baxay Dawladda Hoose Ee Muqdisho.	

Hadaba qoraalka sare iyo kan soo socda oo wada xariira ayaa dhinacyada heshiiska waxay caddeynayaan sidatan:

ISKA IIBIYE: Aniga oo ah C/qaadir Maxamed Yuusuf, waxaan qoraalkaan ku cadaynayaa aniga oo maskaxda iyo caqligaba kafiyoow in aan ka gaday kuna wareejiyey Nur Hashi Dirshe oo tilmaamihiisu sare ku xusan yihiin, waxaan kale oo aan cadaynayaa in gurigaan uu ka madax banaan yahay rahan, xuquuq ama sheegasho cid kale, iyo wax kasta oo horjoogsan kara heshiiskan, isla markaana aan anigu mas'uul ka noqon doono wixii ceebaal milkiyadeed ah ee la xiriira isla gurigaan oo ka kooban 6 qol, 2 musqulood, jiko iyo wareegooda oo wada dhagax ah, waxaan kaloo caddaynayaa in aan qaatay dhammaan lacagta sare ku xusan, wixii taariikhda sare ka danbeeyana gurigaan milkiyadiisa, faa'iidadiisa iyo bixinta canshuureedba wuxuu u wareegay iibsade Nur Hashi Dirshe.

WAKIILKA IIBSADAHA: Aniga oo ah Salaad Xaashi Diirshe, waxaan dhankayga heshiiskan ku caddaynayaa in C/qaadir Maxamed Yuusuf si buuxda iigu wareejiyay gurigaan lehna sifaha uu ku soo xusay isla markaana aan u gudoomay iibsadaha gurigaan, una saxiixay kaalintiisa heshiiskan.

MARKHAATIYAASHA: Anaga oo kala ah 1-Xasan Xaashi Diiriye, 2-Muxyadiin Maxamed Maxamuud, waxaan qoraalkaan ku cadaynayaa in aan markhaati iyo goob joogba ka nahay beeca dhulka sare ku xusan.

SAXIIXA ISKA IIBIYAHA GURIGA

C/QAADIR MAXAMED YUUSUF

1- XASAN XAASHI DIIRIYE

SAXIIXA WAKIILKA IIBSADAHA

SALAAD XAASHI DIIRSHE

2- MUXYADIIN MAXAMED MAXAMUUD

Rep. 89799/MPN/2025

(CADDEYNTA NOOTAAYAHA)

Tr. 23/04/2025

Anigoo ah Nootaayaha Muqdisho, Dr. Saciid Cali Cosoble, waxaan caddeynayaa in saxiixyada sare yihiin kuwii runta ahaa 1- C/qaadir Maxamed Yuusuf (ahna iibiyaha guriga), 2- Salaad Xaashi Diirshe (ahna wakiilka iibsadaha guriga), iyo waliba Labada Nin ee Soomaaliyeed oo dhanka maragga ka caawiyey oo kor ku xusan, Dadkaan oo anigu aqoonsadey hubiyeyna in magacyadaas ay leeyihiin waxay heshiiskan igula saxiixeen Xafiiska iyaga oo xis qaba raalina ah, Caafimaad qaba, Xiskooduna taam yahay, Cid khasbeysana aysan jirin, Waana Beec ansax ah oo Waafaqsan Shareecada Islaamka.

Iy: Baniin



NOOTAAYAHA
DR. SACIID CALI COSOBLE





FOOMKA BIXINTA DUKUMINTIGA

Tr. 05/05/2025

Aniga oo ah **Cabaas C/laahi Maxamed** waxaan halkaan ka cadeynayaa in aan ku wareejiyay **Muxyadiin Maxamed Maxamuud** Dukumiintiga **Original** Wakaalada Gaarka ah **Rep No. 1552/T.P.N/25, Tr. 03/05/2025**, faah faahintiisuna tahay sidan soo socota:

Magaca La Wakiishaha	Muxyadiin Maxamed Maxamuud
La Wakiishay	Dhul
Cabirka	20X15-M
Ku Yaallo	Muqdisho, Degmada Hodan
Lotto Lambar	2580-F
W.M.L	Rep.89799/MPN/2025, Tr. 23/04/2025 Ka soo baxday Nootaayo Muqdisho
Taariikhda Wakaalada	03/05/2025

La Wakiishe: Aniga oo ah **Muxyadiin Maxamed Maxamuud**, Leh Tel No. **0618968999**, Degan **Dayniile** Waxaan Halkaan ka Cadeynayaa in aan ka Qaatay Xafiiska **Nootaayaha Tayo** Dukumiintiga Wakaalada faah faahinteedu Sare ku cadahay.

Sawir

SAXIIXA DUKUMINTI BIXIYAHA

Cabaas C/laahi Maxamed

SAXIIXA DUKUMINTI QAADAHA

Muxyadiin Maxamed Maxamuud

Muxyadiin